


# Sii-deynta Muddo Cayiman qofka Magangalyo doonka ah- (Military Parole in Place, MPIP)

## Maxaa looga jeedaa?

MPIP waa sharci ku meel gaar ah oo u oggolaanaya xubnaha qoyska qaar kamid ah ee shaqaalaha milatariga Maraykanka inay ku sii sugnaadaan Mareykanka inta codsigooda deganaanshaha rasmiga ah laga baaraandegaayo.

## Yaa u qalma?

- Xaaska/ninka ama ilmaha aan wali guursan (da'diisu ka yar tahay 21 sano) ee qof muwaadin Mareykan ah oo u adeegga hadda Ciidamada qalabka sida ee Mareykanka.

- Xaaska/ninka ama ilmaha aan wali guursan ee qof si sharci ah deganaansho oga haysta Mareykanka una adeegga hadda Ciidamada qalabka sida ee Mareykanka.

- Xaaska/ninka ama ilmaha aan wali guursan ee nool ee uu dhalay xubin katirsanaa ciidamada Mareykanka oo dhintay asagoo/ayadoo shaqada kujirta ama u dhintay sababo la xariira adeeg ku xiran naafonimada.

**Iskaan mari, oo guji, Koodhka QR-ka hoose si aad u booqato Xafiiska Militariga iyo Arrimaha Halyeeyada si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.**

## Waa maxay dheefaha laga helaayo?

### Kusii nagaanshaha Mareykanka

Sharcigaan wuxuu u oggolaanayaa xubnaha qoyska ee xaqa u leh inay ku sii nagaadaan Mareykanka inta codsigooda deganaanshiyaha joogtada ah laga baaraandegayo.

### Oggolaansho Shaqo

Wuxuu bixiyaa oggolaanshaha shaqada, wuxuuna xubnaha qoyska ee u qalma u oggolaadaa inay ka shaqeeyaan Mareykanka.

### Safar

Wuxuu xubnaha qoyska ee u qalma u oggolaadaa inay u socdaalaan meel ka baxsan mareykanka ayna dib usoo laabtaan ayagoo isticmaalaya sharciga sii-deynta cayiman.

**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, ama u codsato, booqo webseedka USCIS adoo iskaan marinaaya, ama gujinaaya, koodhka QR-ka hoose.**